

muhimadda ay siyaasada dhalinyaradu u leedahay dhalinyarada Soomaaliyeed sidaa darted

- a. Shirku wuxuu isku raacay inaaney dhalinyarada soomaaliyeed dani ugu jirin siyaasad dhoodhoob ah oo shaqsiyaad aan baahida dhalinyarada ka warqabin ay qol mugdi ah ku dhex qoreen
 - b. Shirku wuxuu isla qaatay in la sameeyo Guddi dhalinyaro oo ka kooban dhamaan maamul goboleedyada iyo gobolada dalka si ay muddo sideed bilood gudohood ah ugu diyaariyaan siyaasad dhalinyaro qaran oo dhalinyaradu leedahay isla markaana ka fog daneysi qabiil, koox ama maamul gooni ah.
5. Shirku wuxuu Hay'adaha caalaamiga, kuwa maxaliga ah, iyo Ganacsatada Soomaaliyeedba ugu baaqayaa in shaqo abuur loo sameeyo dhalinyarada Soomaaliyeed si looga hartago tahriibka, xalna loogu helo dhibaatooyinka abni ee wadanka ka jira
 6. Sidoo kale shirku wuxuu si isku mid ah ugu baaqayaa doowlad Goboleedyada iyo dowladda Dhexaba in dhiiri gelin loo sameeyo dhalinyarada soomaaliyeed iyadoo loo marayo hanaan xirfad iyo shaqo abuur ah si looga hortago xagjirnimada iyo in dhalinyarada loo adeegsado abni daro
 7. Shirku wuxuu isku raacay inay lagama maarmaan tahay in dhalinyarada soomaaliyeed laga qeyb geliyo talada iyo hanaanka maamul ee dalka isla markaana fursad loo siiyo inay helaan xaqqa hogaamineed ee dhalinyaradu leedahay.
 8. Madasha wada tashiga iyo beesha caalamku waa inay dhalinyarada ka qeyb geliyaan haananka siyaasadeed iyo go'an ka gaarista aayaha Soomaliya
 9. Shirku wuxuu ku baaqayaa in la sameeyo olole wacyi-gelin ah oo ay horkacayaan ururrada bulshada soomaaliyeed sida culuma`udiinka, haweenka iyo dhalinyarada si looga hortago faafitaanka xagjirnimada isla markaana loo yareeyo khatarteeda
 10. Shirku wuxuu ku baaqayaa in caddaaladda la hor keeno cid kasta oo ku lug yeelata falalka tahriibinta dhalinyarada Soomaaliyeed isla markaana laamaha garsoorka wadanku yagleelaan sharciga lagula dagaalamo falka tahriibka.
 11. Shirku wuxuu guud ahaan beesha caalamka ugu baaqayaa inay si hufan oo hagar la'an ah u garab istaagaan dhalinyarada Soomaaliyeed wada shaqeyn toos ahna la yeeshaan si loo gaaro ujeedooyinka dhalinyarada Soomaaliyeed Higsanayaan.
 12. Shirku wuxuu ugu baaqayaa dowladda dhexe, Maamul goboleedyada, siyaasiyiinta madaxa banana iyo beesha caalamkaba in doorashada 2016 ka laga qeyb geliyo dhalinyarada laguna daro soo xulayaasha xubnaha baarlamaanka iyo xubanaha baarlamaanka laf ahaantiiba
 13. Shirku wuxuu isku raacay in ururka dhalinyarada qaranka ee hadda jira muddo kordhin loo sameeyo taasoo ku eg August 2017 isla markaana dib u qaabeyn lagu sameeyey hanaanka dhisme ee ururka lana bedelay gudoomiye ku xigeenkii iyo xubno kale laguna bedelo xubno dhalinyaro ah oo ka kala yimaada ururrada dhalinyarada ee maamul goboleedyada iyo gobolada dalka.
 14. Shirku wuxuu ku heshiiyay in shirka kan xiga lagu qabto Cadaado ama Garoowe si daba gal loogu sameeyo qodobadii shirkan ka soo baxay isla markaana loo sii amba qaado howlaha culus ee dhalinyaradu higsaneyso.

WABILLAH TOWFIHQ